

- Goobta Waaxda Militariga ee Washington (Washington Military Department), waxaan horumarinaa dhaqan halkaas oo shaqaalaheena lagu aqbalo, lagu ixtiraamo, oo loola dhaqmo sidii la-hawlgalayaal siman camal.
- Heer kasta - laga bilaabo mid aad ugu sareeya ilaa kan ugu hooseeya ee shaqaalahayaga - waxaan qiimo sare ugu yeelnaa lahaanshaha iyo kala duwanaanshiyaha si siman oo wada muhiim ah si loo abuuro jawi-deegaaneed soo dhaweyn leh oo dadku rabaan inay ka shaqeeyaan.
- Ballanqaadkayaga u adeegida iyo rabitaankeena ah inaan dadka kale ka hormarinno nafteena ayaa ah mid dhaafsan sinjiyada, qolada, caqiidada diineed, jinsiga iyo nooca galmada.
- Waa inay noqotaa - sababtoo ah waxaa noo sugnaaday hadaf muhiim ah.
- Marka la joogo Washington Military Department – waxaa mas'uul nalooga dhigay ilaalinta hantida, deegaanka, dhaqaalaha iyo dadka Washington. Taas macnaheedu waa qof kasta oo jooga gobolkeena.
- Wuxaan bixinaa xirfadlayaal tababaray iyo ciidan hawlgelineed oo diyaar u ah difaaca gobolkeena iyo qarankeena.

- Waxaan dhawrnaa nolosha oona ilaalinaa hantida.
- Waxaan ka jawaab-celinaa xaaladaha degdeggaa ah iyo masiibooyinka.
- Waxaan kor u qaadeynaa adkeysiga bulshooyinka anagoo u marinayna fursado beddel u ah waxbarashada oo habaysan oo loogu talagalay dhalinyarada niyad ahaanta ka goostay.
- Markaad tixgeliso dhammaan siyaabaha aan tan u samayno, way caddahay sababta aan mudnaanta u siinno awoodda koox kala duwan. Waa inaan matalnaa dadka kala duwan ee aan u adeegno.
- Marka la hayo shaqadaas muhiimka ah waxay la timaaddaa mas'uuliyadda in lagu daro marin u helka, lahaanshaha, sinnaanta iyo caddaaladda qaab dhismeedka hawl-maalmeedkeena ee Waaxda Milateriga.
- Waxaa naga go'an inaan la kulano mas'uuliyaddaas.
- Ficilada wakaaladda ee ka tarjumaya ballan-qaadkan waxaa ka mid ah:

- Ku darida hadafyada qorshaha istaraatijiyyadeed ee wakaaladda si kor loogu qaado kala duwanaanshaha, sinnaanta iyo ka mid yagleelida gudaha Waaxda Milatariga ee Washington.
 - Sameynta iyo buuxinta jagooyin cusub oo u heellan taageeridda kuwa leh aqoonta Ingiriisiga ee xaddidan, kuwa leh baahiyaha marin u heleed iyo shaqeed, iyo sidoo kale Qabiilladeena.
 - Xaqijinta in shaqaalaheenna ay yihiin kuwo tababaran oo ayna yihiin kuwo ku muujiya ixtiraam iyo sharaf goobta shaqada.
 - Dib u eegista xogta istaatistikada dadyowga si loo aqoonsado caqabadaha shaqaaleysiinta.
 - La shaqaynta la-hawlgalayaashayada adeeggaa ee u hooseeya si aan u xaqijino in qof kastaa uu si siman u heli karo barnaamijyadayada.
-
- Taasi waa sababta aan u rabno inaan maqalno codadka kuwa taariikh ahaan aan si fiican loo matalin iyada oo loo marayo horumarinta joogtada ah ee kuwayaga ah Taageerida-Sinnaanta Ka-hortagga Cunsurinimada, ama Kooxdayada Taageerida-Sinnaanta Ka-hortagga Cunsurinimada (Pro-Equity Anti-Racism, PEAR).

- Codadkani waxay ka imanayaan gudaha hay'addeena, iyo sidoo kale kuwa aan ugu adeegno bulshada dhexdeeda.
- Waxaa naga go'an in aan si daacad ah u qiimeyno agabyadeena, taageeradayada, ballanqaadkeena, iyo kartidayada.
- Wuxaan u baahanahay jawaab-celintaas daacadnimada ay ku dheehan tahay si aan u helno oona u saarno caqabadaha una sameyno marin u hel ka sii wanaagsan barnaamijyadayada, adeegyada, hawlahayaga, hababkayaga iyo habraacyadeena.
- Tan ugu muhiimsan, shaqadani waxeey noogu qaabeyn doontaa si aan ula kulanno caqabadaha adag ee qarniga 21^{aad} oona si guul leh u xaqiijino in shaqadeennu ay buuxiso baahiyaha qof kasta oo aan u adeegno.